Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 6aad** **FAAFIN SANADLE** **Muqdisho** **2018**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2018**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# SANADKA

# 2018

## UJEEDDO: GO'AAN GOLE ANSIXINTA SIYAASADDA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

***Markuu Arkay***: Qodobada 99aad (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG,

***Markuu Arkay***: Qodobada 100aad (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG

***Markuu Arkay***: Warqadda Summaddeedu tahay WQM&HDQ /OM/367/2018 ee 30/05/2018 kuna saabsan soo Jeedinta Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maal-gashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha uu ku codsanaayo ansixinta iyo Meel-marinta siyaasadda Kormeerka iyo Qiimaynta.

***Markuu Arkay***: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.47.07.18** ee **12/07/2018,** kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimaynta"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

***Markuu Tixgeliyay***: Muhiimadda ay leedahay Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimeynta.

### *Wuxuu Xeeriyay*

### Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Summaddiisu tahay **SHGW.00.47.07.18** ee **12/07/2018** kuna saabsanaa ansixinta "**Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimaynta"** oo uu Goluhu cod buuxda ku ansixiyey.

**Qodobka 2aad**

Siyaasadda Kormeerka iyo Qiimaynta waxa ay dhaqan gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: 
TAARIIKH 16/7/2018
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Dowladda Federaalka Soomaaliya

# WASAARADDA QORSHAYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA

# SIYAASADDA QARAN EE KORMEERKA IYO QIIMEYNTA

May 2018

**Gogol-xaadh**

Sida dowladaha kale oo dhan. Caqabadda ugu weyn ee Dowladda federalka Somaliya waa sidii ay ku noqon lahayd mid waxter badan leh.

Mid kamid ah jidadka ay dowladeennu ku xallin karto Caqabaddani waa adeegsiga kormeer iyo Qiimeyn (K&Q) waxter leh. Geeddi socodyada K&Q Waxay dowladda ka caawin karaan qiimeynta waxqabadkeeda iyo aqoonsiga /garashada waxyaabaha Gacanta ka gaysanaya ama saameynta ku leh adeegyadeeda.

Waana sababtan. Midda ay Wasaaradda Qorshaynta. Maalgashiga iyo Hurumarinta Dhaqaaluhu ay ugu faraxsan tahay in ay soo bandhigto Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta (K&Q) ee Qeybta dadweynaha ama dowladda.

Siyaasadda K&Q waxaa loo naqshadeeyay in ay aasaasto qaab-dhismeedka guud iyo halbeegyo ay Adeegsadaan guud ahaan qeybta Dowladdu. Si ay ula socdaan hor-u-kaca dhaqan-galinta iyo qiimeynta Dhammaan siyaasadaha. Barnaamijyada iyo mashaariicda dowladda. Waxay siyaasadani bixineysaa Habraac cad oo kormeerka iyo qiimeynta lagu dhex abuurayo qeybta dowladda. Waxa ay sidoo kale Siineysaa hagitaannada iskuduwidda. Maamulka iyo maareynta guud ee dhaqan galiyeyaasha.

Siyaasaddan waxaa loo qaabeeyay inay xalliso kala duwanaashaha caadooyinka jira ee dhanka dabagalka Waxqabadka iyo qiimeynta siyaasadaha iyo maal-gashiyada dawladda. Waxa ay wanaajin doontaa Wax qabadka qeybta. Iyadoo xoojin doonta howl-gallada shaqada. Soo-saaridda iyo adeegsiga macluumaad uqalma kharashka galaaya oo ku aaddan natiijooyinka istaraatiijiyadaha siyaasadaha. Barnaamijyada iyo mashaariicda Qaranka. Waxa ay awoodsiin doontaa dowladda federalka soomaaliya. Sharcidajinta iyo matalayaasha kale inay helaan cadayn weyn si ay uqaataan og’aamada siyaasadeed iyo barnaamij iyo si ay ugula xisaabtamaan qeynta dadweynaha iyo adeegsiga kheyraadkooda.

**Qaababka.** Siyaasadani waxay khuseysaa dhammaan siyaasadaha. Istaraatiijiyadaha Barnaamijyada iyo mashaariicda dadweynaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya Wasaaradaheeda Dowladaha xubnaha ka ah Federaalka. Dowladdaha hoose. Iyo wakaaladaha fulinaya barnaamijyada dadweynaha.

Waxaan dhiiri galinayaa dhammaan dowladda iyo dan wadaagayaashoodu inay akhriyaan fahman oo ay dhaqan galiyaan siyaasaddan iyagoo udaneynaya wanaaga qaranka.

## 1.0 Taarikh.

1. Tan iyo markii ay burburtay Dowladdii dhexe 1991kii Soomaaliya waxaa ay soo martay marxalado aad u adag. Hase yeeshee marka laga yimaado marxaladahaa qal-qalafsanaa ee isbabadalaayay. Qaranku wuxuu samanayaa talaabooyin yididiilo leh oo muuqan karo. Sida lagu sheegay falanqaynta Bangiga Horumarinta afrika kadib in kabadan labaatan sano oo colaad ah. Soomaaliya hadda waxa ay taagantahay meeshii ay kasoo labaneysay" marka laga eego dhanka siyaasadda cafimaadka qabta iyo horumarada nabadgalyada iyo sidoo kale balanqaadyada beesha caalamka si xal waara loogu helo dhibaatooyinka dabada dheeraaday ee waddanka ka jiray. Soomaalia waxaay gashay waji cusub oo soo hagaagid nabadgalyo. Daganaansho siyaasadeed iyo ka soo kabasho burbur dhaqaale kadib markii ay dhammaatay siyaasaddii kalaguurku /kumeelgaadhku 20kii Ogosto ee 2012.
   Dowladihii kumeelgaadhka ahaa waxay jidka u xaareen Dowladda cusub ee Federaalka Soomaaliya (DFS) iyadoo oo ay uga tageen Dastuur kumeel gaar ah iyo Baarlamaan. Muuqaalka guud waa mid aad uga fiican marxaladihii ay kusugnayd xilliyadii hore.
   Si kastaba ha ahaatee. Xaaladdu waa mid aad ujilicsan"[1]

---

[1] African Development Ban Group, Somalia Country Breif 2013-2015, OREB Department. March 2013

2. Sikastaba ha ahaatee, "dib usoo labashadani" waa mid leh caqabadaheeda gaar ahaaneed marka ay timaado dhanka dhisida Qaranka. Qaranku wuxuu ubaahanyahay qorsheyn. Tasoo hal-beega iyo warbixintu ay tahay curiyayaasha ugu muhiimsan. Haddaba marka laga eego dhanka Falanqaynta Bankiga Horumarka ee Afrika (ADB) waxay qabtaa in dhaqaalaha aa-saasiga ah iyo istaatiks-ka bulshadu Soomaaliya ay wali tahay mid aad uliidata. Xaaladu waxay sii xumaatay 20kii (labaatankii) sano ee khilaafka iyo natiijooyinkii ka dhashay burburkii hay'addihii wadanka. Jiritaanka xaqiiqooyin hay'addo gooni utaagan oo dhuleed iyo kuwa siyaasadeed ayaa sababaya xaqiiqooyin dhaqaale oo murugsan waxayna siixumeyneysaa arrimaha helidda xog lagu kalsoonaan karo ama la isku waaafaqsan yahay guud ahaan Soomaaliya. Nidaamka istaatistiku waa mid aad u liita, muddo dheerna lama qaban sahan ku filan oo ku saabsan dakhliga iyo kharashaadka qoyska. Natiijaduna waxay noqotay in ay aad u adkaato. Oo ay ku dhawaaato inaysanba suurtagal ahayn in lasameeyo qorshayn iyo barnaamijaynta shaqo, iyo sidoo kale in la kormeero horumarka dhaqaale iyo bulsho iyo Himillooyinka Horumarinta Qarniga (MDGs[2])

3. A ragtidani waxay farta ku fiiqeysaa hay'adaha liita, dadka ku takhasusay arrimaha Dhaqan-dhaqaalena waxay si guud isugu waafaqsanyihiin in uu xidhiidh ka dhaxeeyo guuldarada Horumarka iyo hay'adaha liita. Aragtidan wxay waafaqsan tahay falanqaynta Bankiga Horumarinta Afrika (ADB) oo isna qaba "waxaa jira xaqiiqsi sii kordhaaya oo ka dhalanaya sababaha ugu muhiim san ee guuldarooyinka horumarka ee wadamada liita iyo horumarka dhaqaaluhu waa daciifsanaanta gudaha ee hay'adaha iyo geedi socodyada Qorshaynta horumarka iyo maareynta dhaqaalaha: Farsamo liidata oo qorshaha u turjunta

---

[2] Ibid (Waxaan ku macneeyay faqrada 25.

dhaqan-galinta dhab ah; la'aanta farsamooyin ku haboon oo muwaadiniinta looga qeyb-galinaayo geedisocodyada horumarka iyo sidoo kale isgaarsiinta natiijooyinka horumarka iyo fulinta liidata"

4. Anbaqaadka dhisidda Qaranka, Soomaaliya waxay u baahantahay inay xaqiiqsato in dib-u-dhiska Dawladeed oo xoogan loo galo dadaalo deg deg ah kuwaas oo loola qasdayo dib-u-soo celinta awoodaha hay'addaha, bulshooyinka iyo meel-dhigida qaab-dhismeed maamul wanaaga lalana xisaabtamikaro oo wax ku-ool ah, xoojinta hay'addaha dawliha ahi waxay ahmiyad wayn u yeelaneysaa kobcinta hay'adah kadib khilaafka mudada dheer soo jiray xaaladaan oo kale, wax kaqabashada farqiyada (waxyaabaha ka dhiman ) xogta iyo istaatiitiska oo si wadajir ah loo xaliyaa wa in ay noqotaa shuruud deg deg ah oo ugu sareysa (muhiimsan) .

5. Soomaaliya waay bilaawday geedi-socodkan sidoo kalene qorshayna way dardargalisay qorshaha horumarimta Qaranka (QHQ) ee haatanjira ee dabaoolaya sanad miisaaniyadeedka 2017 ilaa 2019 waakii ugu horeeyay ee ay sameysato Dawldda dhexe ee Soomaaliya ilaa 1986. QHQ-ku waxaa lagu duldhisay asaaskii adkaa ee uu dhigay heshiiskii cusbaa ee Soomaaliya ee loo yaqaanay : *new deal compact for soomaalia*" kaas oo qeexayay mudnaanihii ay lahayd soomaalia intii u dhaxeysay 2014-2016.

6. Inkastoo QHQ la diyaariyay ayadoo ay dawladdu sameeysay dadaal kasta oo sida ugu fiican loo adeegsanayo xogta laheli karayay haddana waxaa jirta xaqiiq aan muran ku jirin oo ah in QHQ uu wax badan ka faa'iidi lahaa hadii la heli lahaa xog istaatistikis ah oo ka wanaagsan kana macquulsan tii la isticmaalay gaar ahaan istaatistikis-ka looga baahnaa hir-galint qeybaha xisaabaadka qaran. Tani waxay sidoo kale quseysaa

uruurinta guud iyo isticmaalka xogta Q&K taas oo loobaahan doono si loola socda loona cabiro/qiyaaso hor-u-kaca QHQ.

7. Baahida looqabo nidaamyo koormeer oo xoog leh si loo qiimeeyo hor-u-kaca ayaa si dheeraad ah culees loo saray maalgalinta deeq bixiyayaasha iyadoo xooga lasaaray islaxisabtankan natiijoyinka horumarka maadaama Soamaaliya tahay mid hesha kaalmo deeq oo aad u balaadhan Hanaanka dawladda ee isticmaalka kaalmado waa mid waafaqsan mabaad'i badan oo mid kamid ahi yahay islaxisaabtan wada jira (mutual Accountability) taasoo ay cadahay in qaatayaasha iyo bixiyayaasha kaalmadu ay heshiis ku yihiin in mid walba dhankiis mas'uul Uga yahay waajibaadyada ku aadan. Islaxisaabtanka wadajirka ahi ayaa sidoo kale laga soo qadayaa inuu ku saleysan yahay fikradda danwadaag oo loo siman yahay iyo cadaalad.

8. shaqooyinka waajibaadyadu dhammaan ilaa hadda lagu kormeerey si loo taakuleeyo waxterka iyo isku duwidda howlaha waa mid xiligan la joogo ikhtiyaar ah heshiiskii cusbaa ee Soomaaliya ee "*New Deal Compact For Somalia*" waxaa la ansixiyay isagoo wadanin farsamooyin qiimeyn iyo kormeer, taasina waxay qasabtay in ilaa sanadkii 2013 Dawladda iyo danwadaagta horumarineed (DPs) ay diirada saaraan aqoonsiga, la socoshada iyo ka warbixinta hor-u-kaca labada dhinac si ay u dhiira galiso isticmaalka nidaamyada Dawladda wakhti kaddib. Ma jirin wax toos ah oo qasbayay fulinta howsha. La'aanta kormeer, dib-u-eegid iyo qiimeyn nidaamsan oo haboon ayaan suurogalinin hal beegida (cabirida) natiijooyinka.

9. Si looga gudbo caqabadihii uu wajahay heshiiskii hore (*the Compact*) waxaa la diyaariyay habraac kormeer iyo qiimeyn (K&Q) leh yool asaasid kormeer iyo qiimeyn (K&Q) awood badan, dhameystiran, leh ka qeybgal buuxa, is waafaqsan oo si heer sare ah la iskugu duway si loo hago kormeerka dhaqan galinta QHQ iyo qiimeynta saameyntiisa. Si la isugu dhafo faa'iidooyinkan, isku dabaridka

diyaarinta hab raac K&Q sharci ah oo cad, waxaana shaki ku jirin in siyaasaddani ay timid waqtigii ku haboonaa.

## 2.0 Ujeeddada iyo Himmilooyinka Siyaasaddan

### Ujeeddo

10. Ujeedka siyaasaddani waa inay hagto fulinta nidaam kormeer iyo qiimeyn si wanaagsan la isugu duway oo lagu fuliyo Dowladdaha Xubnaha ka ah Federalka. Wasaaraddaha Bahwadaagta ah. Wakaaladaha Dawladda ee hoos yimaada DFS. Si loo wanaajiyo Waxqabadka qeybta dadweynaha (Public Sector).

### Himmillooyinka Khaaska ah

11. Himilooyinka khaaska ah ee Siyaasaddani waa:

- In lagu lifaaqo K&Q. dhaqamada maareynta ee DFS, DXF, Wasaaraddaha, Agaasinada Wakaaladaha Dawladda iyo Dawladdaha hoose.
- In la xoojiyo Hay'adaha dawliga iyo kuwa gaarka loo leeyahay isuduwida soo saarida iyo isticmaalka macluumaadka ujeedka leh ee dhaqan-galinta iyo natiijooyinka qorshayaasha. Siyaasadaha, barnaamijta iyo mashaariicda Qaranka:
- In la balaariyo daboolka siyaasadaha iyo barnaamijta dadweynaha ee wajahaaya qiimeynta xeel dheer si loo xaqiijiyo in dajiyaasha siyaasaddu ay ogsoonyihiin kuwa shaqeyn kara iyo kuwa aan shaqeyn Karin:
- In la qeexo habraaca hay'adeed iyo mas'uuliyadaha matalayaasha kala duwan ee qeybta ka ah u kuurgalka siyaasadaha iyo barnaaamijta dadweynaha:
- In la xoojiyo awooddaha DF iyo Wasaaradaha DXF, iyo Dawladdaha hoose ee dhanka shaqaale khibrad leh. Kaaba yaasha aasaasiga ah iyo siyaasad deegaan si ay umaareyaan una dhaqan-galiyaan siyaasaddan.

- In la dajiyo hal beegyo (standard) lana aasaaso shuruudaha qaabka kormeerka iyo qiimeynta loogu sameynayo hawlaha qeybta kaasoo waafaqsan mabaadi'da caalamiga ah. Dhaqamada iyo hal beegyada K&Q.

**Baaxadda.**

12. Siyaasaddani waxaa ay qeexaysaa sida loo maareeyo dhaqan-galinta gaar ahaan kormeerka iyo qiimeynta barnaamijta iyo mashaariicda qeybta dadweynaha (Public Sector). Qeybta dadweynaha ee Dawladda Federaalka Soomaaliya waxa kamid ah Wasaaraddaha Bahwadaagta ah ee qaranka. Wakaaladaha Dawladda. Dawladdaha Xubnaha ka ah Federaalka. Dawladaha hoose iyo cidkasta oo isticmaasha maal-galinta fanka dadweynaha.

13. Siyaasaddani waxay U qeexan tahay sidan:

- Kormeerka iyo qiimeynta lagu fuliyo qeybta Dadweynaha:

- Dowrarka iyo Mas'uuliyadaha ka qeyb qaataytayaasha / matalayaasha muhiimka ah ee kormeerka iyo qiimeynta barnaamijyada iyo mashaariicda bulshada /dadweynaha:

- Abuuridda qaab-dhismeedyo hay'adeed oo caawiyo nidaamyada kormeerka iyo qiimeynta :

- Habraac warbixinta ee Dhaqan-galinta kormeerka iyo qiimeenta barnaamijyada iyo mashaariicda qeybta dadweynaha:

- Kobcinta awoodda kormeerka iyo Qiimeynta:

- Qorshayaasha isku duwidda ee kormerka iyo qiimeynta qeybta dadweynaha:

- Bixinta kheyraad ku filan oo suurta galiya shaqada (raasamaal dadeed- oo leh khibrado, kartiyo kormeer iyo qiimeynta loo baahyahay: Qoraal adag iyo mid Fudud oo ku haboon

dhaqaajinta nidaam kormeer iyo qiimeyn leh karti elektaroonik: iyo Raasamaal maaliyadeed oo xaqiijin doona in si guul ah loogu dhameystiro mashaariicda iyo barnaamijyada).

**Dib-u-eegidda Siyaasadda.**

14. si loo hubiyo in siyaasaddu wali tahay mid ku haboon ama muhiim u ah duruufaha isbadbadalaaya sidoo kalana ay wali tahay mid waafaqsan mabaadi'da dhaqamada iyo hal-beegyada caalamiga ah ee ugu sareeya. Waxaa lagu sameyn doonaa dib-u-eegid lana cusboonaysiin doonaa hadba sida loogu baahdo.

15. Dib-u-eegidda iyo cusboonaysiinta siyaasadani waxaa lagu cadeyn doonaa soo saarida wax ka badalada (issuance of amendments), si loo muujiyo dib-u-habaynta shuruucda iyadoo lagu salaynaayo isbedelada dabiiciga ah ee hawlaha kormeerka iyo qiimeynta iyadoo sidoo kale la tixgalinaayo dhaqamada wan wanaagsan ee caalamiga ah.

16. marka wax laga badalo siyaasadda. Taariikhda dib-u-eegidda iyo taariikhda uu dhaqan-gelaayo isbadalku waa in sicad loo diiwaan galiyo.

17. Wasaaradda Qorsheynta (MOPIED) ayaa ilaaliye ka ah siyaasaddan ayadaana mas'uul ka ah inay soo jeediso talo-bixinta wax kabadalka siyaasadda. Taasoo uu ansixin doono xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Qorsheenta MOPIED. Agaasimaha guud ee agaasinka K&Q ee Wasaaradda Qorshaynta MOPIED ayaa mas'uul ka ah ilaalinta diiwaanka Dhammaan talabixinta waxkhabadka siyaasadda ee ka yimaada xubnaha gudihiisa iyo daneeyayaasha kale ee K&Q ee guud ahaan wadanka.

18. Qiimeyn toos ah oo waqti-waqit ah ee siyaasadda oo faah-faahsani waxay ku dari aragtiyo khibradeed oo dibada ah taasoo siyaasadda ka kadhigeysa mid waafaqsan hal-beegyada K&Q

ee caalamiga ah. Dhaqamada ugu wanaagsan iyo duruufaha isbadbadalaaya. Sidaa daraadeed , geedi socodka qiimaynta waa in la fuliyaa labo iyo tobanka (12) bilood ee ugu horeeysa dhexdooda, kaddib wixii intaa ka dambeyana 5 (shan) sano hal mar.

3.0 **Fikradaha muhiimka ah**

**Kormeer:**

19. Ururka Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Horumarinta/Guddiga Kaalmada Horumarinta (OECD/DAC) waxay kormeer ku qeexeen sidan “hawl taxane/joogto ah taasoo adeegsata xog aruurin nidaamsan oo lagu sameyo tusayaal (Indictors) gaar ah si maaraynta iyo daneeyayaasha muhiimka ah ee faro-galinta horumarineed ee socota ay u siiyaaan aragti heerka horusocod iyo gaadhid ee himillooyinka iyo sidoo kale hor-u-kaca isticmaalka fanka ama miisaaniyadaha loo qoondeeyay” (OECD.2002).

**Qiimeyn:**

20. OECD/DAC Waxay ku qeexday qiimeynta sidan “U-kuur-gal nidaam iyo ujeeddo leh oo lagu sameeyo mashruuuc,barnaamij ama siyaasad socota ama dhamaystimay, nashqadooda, dhaqan gelintooda iyo natiijooyinkooda. Ujeeddada waa si loo ogaado ahmiyadda iyo buuxinta himillooyinka, waxtarka horumarkooda, wax-ku-oolnimada, saameynta iyo waaritaanka Qiimeyntu waa inay noqotaa mid laga helo macluumaad la isku hallayn karo oo faa’iido leh, taasoo awood inoo siineysa in casharadii aan baranay kudabbaqi karno geedisocodka go’aan qaadashada ee qaatayaasha iyo deeq-bixiyayaasha (OECD,2000)[3]

[3] OECD (2002). Glossary of Key Terms in Evaluation and Results Based Management. OECD. Paris

**Dib-u-eegid:**

21. waa u-kuur-galka waxqabadka ama hor-u-kaca siyaasad, qeyb, hay'ad barnaamij ama mashruuc, kaasoo waqti-watiq ah ama aan toos ahayn. Waxay qiimeynta ku kala duwanyihiin, qiimeyntu waxay u kuurgashaa natiijooyinka iyo saameynta howlaha horumarineed, halka Didb-u-eegiddu ay culayska saarto dhinacyada howl-galka/shaqada , sidaa daraadeed waxay si dhaw isugu xidhanyihiin hawsha kormeerka. Dib-u-eegidda waxaa loo qaabayn karaa si dhacdooyin gooraale ah oo ay daneeyayaasha muhiimka ahi uga doodaan waxqabadka arrimaha marka laga hadlayo, sida dib-u-eegidda qiimeynta wadajirka ah ee lagu sameeyo sanadkii sida caafimaadka waxbarashada, iyo biyaha, iwm.

**Indho-indhayn:**

22.waxaa xaqiijin lagu sameeyaa alaabooyinka iyo adeegya ay bixiso Dawladu iyadoo la fiirinaayo inay waafaqsanyihiin heerarka, xeerarka iyo awaamiirta waxaan fuliya dad dibada ahi waxaa raadisaa inay ogaato meelaha nugulka ah iyo ciladaha iyo inay soo jeediso tallaabo sixitaan.

**4.0 Mabaadi'da**

23. Habraaca K&Q ee QHQ wuxuu ku dhisan yahay mabaadi'da hagayaasha ee hoos ku xusan:

1) **Maareynta Natiijooyinka:** Natiijooyinku waxay u taaganyihiin Horumarinta nolosha ama badqabka dadka, taasoo ah natijada laga filayo QHQ. Kormeerka iyo Qiimeyntu waa inay xoogga saartaa cabiridda natiijooyinka QHQ, iyo barnaamijyada iyo mashaariicda la xidhiidha isla markaana dhalisaa casharro lagu horumarinayo waxqabadka mustaqbalka.

2) **Qiimaha Lacagta:** Habraaca K&Q ee QHQ waa in uu raadiyaa sidii loo ogaan lahaa in natiijooyinku (soo-saarka iyo natiijooyinku) ay u qalmaan maalgashiga iyo in kale iyadoo laga eegaayo dhanka

maaliyadda , hantida iyo cududda shaqaale iyadoo lagu saleynayo qiimaha suuqa ee maal-gashigan;

3) **Isla-xisaabtan:** Hay'adaha waxa lagula xisaabtami doonaa soo-saarka(outputs) lagu heshiiyay iyo wax yaabaha laga filayo, waxaana lagu qiimeyn doonaa nidamyo kormeer iyo qiimeyn ah:

4) **Lahaansho:** K&Q waa in ay hogaamisaa mudnaashaha qaranka. Howlaha K&Q waa in si habbon loo qorsheeyaa, la isugu duwaa, loona maamulaa midaamyada qaranka dhexdiisa .

5) **Dan-wadaag:** Dib-u-eegista iyo qiimeynta badan ee daneeyayasha ayaa la dhiirrigelin doonaa si mudnaan loo siiyo daah-furnaanta, lahaanshaha iyo hirgalinta talooyinka qimaynta, iyadoon wax loo dhimeynin kalsoonida/sharafta qiimeynta. Qiimeynta wadajirka ah ee dawladdu iyo deeq-bixiyayaasha waxay sidoo kale gacan ka geysaneysaa yareynta soo noq noqoshada/soo cel-celinta waxayna fududeesaa dhaqaalaha miisaan iyo isu-dheelitirnanta:

6) **Barasho:** K&Q waa in ay hagtaa baaahida macluumaad ee isticmaalayaasha oo ay ku jiraan siyaasad dejieyaasha, fuliyeyaasha iyo dadweynaha. Macluumaadka laga helo midhaha/natiijooyinka K&Q waa in ay noqdaan mid waqti ku saleysan la heli karo oo la adeegsan karo si ay u hagaan siyaasadda iyo go'aammadda barnaamijka. Natiijooyinka laga helo dadaallada K&Q waa in lagu falanqeeyaa Cawaaqibkooda suurta galka ah ee go'aannada maareynta iyo in lagu daro geedi-Socodyada go'aan qaadasho;

7) **Anshaxa iyo Sharafta:** su loo hubiyo kalsoonida iyo faa'iidada K&Q, dhexdhexaadnimda waafaqsanaanta heerarka caalamigaa ah ee uruurinta xogta, falanqaynta iyo warbixinta iyo madaxbannaanida qiimeeyayaasha waa in la ixtiraamo. Hab-dhaqanka /dabeecadaha qiimeeyayaashu waa in ay waaafaqsan yihiin heerarka ugu hooseeya ee loo baahanyahy marka la samenayo qiimeyn leh kormeer habboon.

## 5.0 Shuruudaha Siyaasadda:

## Guud-mar

**24.** Kormeerka, Qiimeynta iyo maareynta istatistikida rasmiga ah wxaa loo tixgalin karaa in ay yihiin kuwo kala duwan oo xayndaabyo kala duwan leh kuwaas oo ay qeyb ka yihiin ama ku lug leeyihiin bulshooyin kala duwan. Laakiin waxaa jira meelo mudan oo ay iskaga dhafan yihiin ama iska soo galaan kuwaas oo si dhaw isugu xidha xeyndaabyada. Waxaa jira faa'iidooyin aad u muhiim ah oo laga helayo wanaajinta xiriirka iyo iskaashiga udhaxeeya xayndaabyadan kala duwan. Dhammaantood waxey wadaagaan qalabka ay adeegsanayaan iyo danaha bixinta iyo falanqaynta xogta oo isku mid ah, laakiin haddane way kala duwanyihiin waana howlo aan shaqo isku laheen. Haddabo barnaamijka kormeerka, qiimeynta istaatistikada waxa uu ka koobanyahay seddex howlood ee kala duwan laakiinse leh isku-xidhka

## Howlaha kormeerka:

**25.** kormeerku waxuu utaaganyahay ama la micno yahy lasocoshada joogtada ah ee gashiga howlaha midhaha natiijooyinka iyo saameynta howlaha horumarinta heerka barnaamij qeyb iyo qaran. Tan waxaa kamid ah kormeerka hor-u-socodka wadanka ee dhanka cabirka qaran ee guusha horumarka sida yoolalka horumarinta qarniga (MDG's)[4] ama yoolyada horumarinta waarta (SDG's)[5].

**26.** Qaabdhismeedka DF, dhammaan wasaaradaha Bah-wadaagta ah Dawladdaha Xubnaha ka ah Federaalka (DFS). Dawladdaha hoose. Wakaaladaha Dawladda iyo Dhaqan-geliyayaasha kale ee miisaaniyadaha/lacagta dadweynaha waa in ay aasaasaan isla markaana socodsiiyaan qeyb kormeer toos oo isku-duwi doonta howlaha kormeerka si warbixinta kor loogu gudbiyo wasaaradda Qorsheynta MOPIED.

---

[4] Millenium Development Goals.

[5] Officials Statistics and Monitoring and Evaluation Systems in Developing Countries: Friends or Foes? Roger Edmuns and Tim Marchant. October 2008

**27.** Si si buuxda loola socda waxqabadka iyo kaqeyb-qaadasha himmillooyinka QHQ. Dhammaan Howlwadeenada / matalayaasha Dawladda waxaa looga baahan doonaa asaasida iyo dhaqan-gelinta arrimaha soo socda:

**1)** Qorsheyaal iyo miisaaniyado leh habraac natiijo cad, geshi qiimo leh, midho iyo natiijooyin lafilaayo iyo sidookale. Tilmaamayaash (indicators) waxqabad kuwaa oo ah khaaas. Lacabirikaro, lahanankaro, muhiim ah isla markaana leh wakhti-cayiman (SMART).

**2)** Qiimeyn hordhac ah loo lagu sameyo suurta galnimada mashaariicda, oo ay kamid tahay, haddii ay suurtagal tahay falanqeynta kharashka iyo faa'iidada (cost-benefits analysis):

**3)** Dib-u-eegid joogta ah oo lagu sameeyo qorshayaasha iyo miisaaniyadda si loo xaqiijiyo in ay yihiin kuwu hadda ah ama waqtiga lasoca

**4)** Kormeerka waxqabadku wuxu ka koobnaan doonaa waxyaabaha soo socda:

a) Istaraatiijiyad kormeer oo ku saleesan shaxda tilmaamayaasha waxqabadka, oo muujinaaya isha, waqtiga, goobta iyo hanaanka xog uruurinta midkaste.

b) Nidaamka maareynta macluumaadka (MIS)si loo fududeeyo qabashada, geedi socodka, falanqeenta iyo isticmaalka xogta kormeerka ee tiirkaste (each pillar) ee ay kujiraan wasaaradaha muhiimka u ah:

c) Shaqaaleyn kormeer oo u dhigma baaxada/ xajmiga howlaha ay qabanayaan

d) Miisaaniyad ku filan oo ay ku kormeeraan barnaamijta iyo Mashaaariicdooda

**5)** Wasaaradda maaliyaddu waa ina ay xaqiijisaa uqabashada miisaaniyad kufilan hay'ad kasta oo ay dawladdu fangareeso si loogu qabto kormeerka iyo qiimeynta taas oo waafaqsan shuruuda lagu qeexay siyaasaddan.

**6)** Qorsheynta kormeerku waa in uu si cad qeyb uga ahaado qorshaynta iyo miisaaniyada heer mashruuc iyo guud ahaanba hay'adaha. Qiyaasta kharashka iyo miisaaaniyadda hawlaha qiinaynta waa in lagu xaliyaaa sida ugu macquulsan marka la qorshaynaayo miisaaniyadahu mashruuca. Miisaaniyadda qiimayntu waa in ay ahaato mid kufilan in ay daboosho baahiyada kheyraadka qiimeynta, taas oo buuxisa shuruudaha qiimeynta ee lagu soo bandhigay siyaasadda

**Tayada shuruudaha kormeerka:**

28. kormeerka wax ku oolka ah in la xaqiijiyo mashaariicda si macquulka ah oo kalsooni leh loo qiimeeyo tilmaamayaashu waa in la qaabeeyo ayadoo la istcmaalayo shuruudo Khaas ah, la cabiri kara, lagaadhi karo, muhiim ah isla markaana leh wakhti cayiman.

1) Khaas: Tilmaamuhu waa inuu yahay mid u cad sida shayga la cabbiraayo isla markaana uu khaas yahay si loo cabiro hor-u-socodka qaabilsan/ku-wajahan natiijada.
2) La cabbiri karo: Tilmaamuhu waa cabir la isku haleen karo waana mid leh himmillo la xaqiinjin karo. Cabbirida/quyaasaha tayo waa in si haboon loogu turjumo/baddalo qaab tiro ah.
3) La gaadhi karo: Tilmaamuhu waa mid xaqiiqdii lagaadhi karo
4) Muhiim: Tilmaamuhu Wuxuu qabtaa waxa la cabirayo (wuxuu muhiim u yahay hawlaha/natiijooyinka).
5) Waqti-cayiman: Tilmaamaha waxaa la rajeynaa inla gaadho muddo waqti cayiman leh.

**Dib-u-eegid Hor-u-socodka Waxqabadka**

1. Dhammaan matalayaasha Dawlad waa inay qabtaan dib-u-eegid waxqbadka muuqda iyo kan maaliyadeed oo waqti ah iyagoo u maraya Dib-u-eegidda rubucle. Qiimeynta sanadkiiba laba (2) jeer iyo tan sanadlaha ah. Dib-u-eegistu waxay diiradda saari waqtiga iyo saxnaanta xogta waxqabad ee la uruuruyay, ka hor inta ay san sare u gudbin warbixinta, waxayna bixin doonaan talo-bixin wixii sixitaan u baahan ee dib-u-eegidda waqtiga xiga.

1. Dib-u-eegis rubucle ee hawl-wadeenada tiirku waxaa ka mid noqon doona uruurinta xogta waxqabadka geshiga iyo midhaha iyadoo loo eegayo qorshe howleedyada si ay ugu gudbiyaan Wasaaradda qorsheynta, Maal-gashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOPIED) iyo hawl-wadeenada Tiirka ay muhiimka u tahay. Dib-u-eegista rubuclaha ahi waxaa fulin doona shaqaale aqoon u leh ah oo qorsheynaya, kormeerka iyo qiimeynta. Dib-u-eegistu waxay diirada saari doontaa habbonaashaha iyo is waafaqsanaanta leh qorshe howleed la ansixiyay iyo saxsanaanta xogta waxqabadka la uruuriyay, ka hor inta aysan warbixinta sare ugudbinin,sidoo kalena inay ka tala bixiyaan wixii sixitaan uga baahan rubuca soo socda.

2. Dib-u-eegista gudaha ah ee sanadkiiba labo (2) jeer, ee hawl-wadeenada. Tiirku waxaa kamid noqon doona aruurinta xogta geshiga iyo midhaha waxqabadka ee natiijooyinka furaha ugu waaweyn sida lagu qeexay tiirka AWP. Dib-u-eegista sanadkiiba (2) jeer waxaa hogaamin doona godoomiyaha. Howl-wadeenada Tiirka (PWG). Waxaana qeyb ka noqon doona dhammaan daneeyayaasha muhiimka ah ee Tiirkaas. Dib-u-eegistu waxay diirada saari waqtiga iyo saxnaanta xogta waxqabad ee la uruuriyay, ka hor inta aysan sare ugudbin warbixinta, waxayna bixin doonaan talo-bixin wixii sixitaan ubaahan sanad badhka 6 (bil). Dib-u-eegiddani waa inay ahaataa mid fudud, waxaa lagu xeel-dheeraan doonaa dib-u-eegista la qabto sanadkii.

3. Dib-u-eegista sanadlaha ah waxaa kamid aha aruurinta xogta waxqabadka geshiga, midhaha iyo meesha laga helikaro xogta natiijada ee natiijooyinka furaha/muhiim ka ah.
   Dib-u-eegista sanadlaha ahi waxay diirada saari qiimeynta waxqabadkii sanad miisaaniyadeedkii la soo dhaafay, waxayna go'aamin ficilada iyo qorshayaasha kharashaadka ee sanadka soo fool leh (sanadka lagu jiro +1). Ficiladan iyo

kharashadkan waa in lagu xaliyaa wax ka baddelka qorshaha NDP-ga. Dib-u-eegidd Tiirka ee sanadlaha ahi waa inuu dhammadaa badhtamaha bisha Oktoobar ee sanadka kasta si loo hubiyo in natijooyinka kasoo baxaa ay geshi ugu noqdaan qorsheynta iyo geedi-socodka miisaaniyada sanadka soo socda iyo warbixinta sanad la ha ee loo gudbinaayo Golaha Wasiirada iyo Baarlamaanka.

**Howlaha Qiimeynta:**

2. Qiimeyntu waa inay bixisaa macluumaad lagu kalsoonaan karo oo faa'iido leh, taas oo inoo siinaysa awood in casharada labartay lagu daro geedi socodka go'aan qaadashada ee deeq bixiyayaasha iyo qaatayaashaba.

3. Si loo xaqijiyo in wax laga barto hirgalinta, dhamaan barnaamijyada iyo mashaariicda lacag toodu ka Badantahy $100,000 waxaa lagu sameyn donaa qiimeyn xeeldheer ama hanta-dhawr qiimo-lacageed ah (Value for money audit). Dhammaan barnaamijta iyo mashaariicdu waa in ay diyaariyaan qorshe qiimeyn oo ay ku jiraa:

    a) Qeexid qeybaha kala duwan ee qiimeynta la qabanayo (qiimeynta asaaska[baseline], muddo – dhexaad [mid-term], dhammaadka[final] iyo saameynta [impact]);
    b) Tusmada habraaca la isticmaalayo;
    c) Dowrarka iyo mas'uliyadaha;
    d) Qorshe-hawleed ;
    e) Miisaaniyad faahfaahsan;
    f) Shuruudaha tixraaca (ToRs) ee wakaaladaha fulinaya; iyo
    g) Qeybinta /gudbinta iyo istaraatijiyada la-socoshada.

4. Nooca qiimeynta ee loo qorsheynayo lana qabanay waa in uu ka turjumaa dabeecadda iyo baaxadda mashruuca. Tusaale,

mashaariicda tijaabada ah ee lagu qabanayo qaar kamida koox ka qeybgalayaal ah ayaa loo dooran karaa qiimeynta saameynta si loo ogaado in maal-gashiga la kordhiyo iyo in kale. Shuruudaha ugu hooseeya ee mashruuc kaste oo kamid ah qeybtan waxaa looga baahanyahay si loo fuliyo wax yaabaha soo socda:

a) Daraasad saasiyadeed inta lagu jiro wajiga hor-dhaca ee naqshadeynta mashruuca;
b) Dib-u-eegid muddo-dhexaad (mid-term) ee badhtamaha mashruuca si loo qiimeeyo hor-u-kaca iyadoo laga fiirinaayo himillooyinka iyo si looga talabixiyo talaabooyinka sixitaanka; iyo
c) Qiimeynta ugu dambaysa ama qiimaha-u-dhignaanshaha lacagta (Value for money) ee dhammaadka mashruuca. Qiimaha u dhignaanshaha lacageed waxaa lagu sameyn mashruuca furaha/muhiimka ah ee adeeg bixinta safka hore kaga jira waa marka qiimaha-u-dhignaanshaha lacagta loo arko in ay tahay shuruudda ugu muhiimsan. Dhammaan mashaariicda kale waxay wajihi doonaan qiimeyn caadi ah oo kamadanbays ah oo xeel-dheer

5. Wasaaradda hormuudka ahi waxay mas’uul ka noqoneysaa naqshadeynta, maareynta iyo la socoshada qiimeynta barnaamijyada iyo mashaariicdeeda (oo ay ku jiraan qiimeynta asaaska iyo midda-dhexe). Dhammaan qiimeynta mashaariicda waxaa fulin doona qiimeyayaal dabada/banaanka ka yimid si looo xaqiijiyo madax banaanida la xidhiidha hanta-dhawrka qiimaha-u-dhignaanshaha lacageed.

6. waa inay waafaqsantahay caadooyinka/dhaqammada caalamiga ah, qorsheynta qiimeynuhu waa in si cad qeyb uga ahaato qorsheynta iyo miisaaniyad u qabashada heer mashruuc iyo guud ahaanba hay’adda. Qiyaasta kharashka iyo miisaaniyada

hawlaha hawlaha qiimeynta waa in lagu xaliyaa sida ugu macquulsan, marka la qorsheynaayo miisaaniyadaha mashruuca. Miisaniyadda qiimeyntu waa in ay ahaato mid ku filan inay daboosho baahiyaha kheyraadka qiimeyn, taas oo buuxisa shuruudaha qiimeynta ee lagu soo bandhigoay siyaasadda.

7. Si loo helo la-socosho iyo waxkabarasho haboon :
   a) Dhammaan dib-u-eegista iyo qiimeynaha waxqabad waxay ka koobnaan doonaan talobixino khaas ah, oo la bar-tilmaameedsaday oo la fulinkaro

   b) Dhammaan hay'adaha la bar-tilmaameedsaday waxey wakhti la xadiday ku bixin doonan jawaab ku aadan talada (talooyink) iyagoo caddeynaya;

      *I.* Talada (talooyink) la bixiyay ay taageersan yihiin inaysan taageersaneen;
      *II.* Ficilada loo baahanyahay si wax loo dhaqan-geliyo talada (talooyink) la soo jeediyay; iyo
      *III.* Waqti xadidan oo leh bar bilaw iyo dhammaad oo looga baahanyahay hirgalinta talada (talooyink) la soo jeediyay

   c) Dhammaan hay'adaha waxaa looga baahan doonaa in ay yeeshaan qorshe lagula soconayo dhaqan gelinta talooyinka, kaasoo la socon doona talooyinka dib-u-eegista iyo qiimeynta, talaabooyinka la-socosho oo leesku waafaqsan yahay iyo xaalada/halka ay marayaan howlahas: iyo.

   d) Waa inay jirto is waafaqsanaan u dhaxeysa tilmaamayaasha iyo bar-tilmaameedyada /yoolasha ku jira QHQ iyo tilmaamayaasha iyo bar-tilmaameedyada qorshayaasha wakaaladaha DXF. Is waafajinta waa muhiim si looga hortago asaasida nidaamyo macluumaad oo is garab socda isku shaqana qabanaya ama soo noqnoqonaaya.

**Tayada Shuruudaha Qiimeynta**

8. Qiimeynta qorshe, siyaasadda, barnaamij ama mashruuc ku jira wejiyada kala duwan waxaa lagu salayn karaa shuruudo kala duwan. Siyaasaddan waxaa lagu saleeyay gundiga qiimeynta hoos ku qoran ee ay diyaarisay gudiga kaalmada Horumarinta (DAC) ee Ururka Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Horumarinta (OECD).

a) **Mudnaanta:** in la hubiyo heerka uu gaarsiisanyahay ku haboonaanshaha ahdaafta qorshe, siyaasadda, barnaamij ama mashruuc ee baahiyaha iyo mudnaanaha kooxaha la beegsanaayo/ba-tilmaameedsanaayo iyo inuu waafaqsanyahay siyaasadaha iyo ahdaafta Horumarinta Qaranka, iyo sidoo kale siyaasadaha deeq bixiyayaashaba:

b) **Wax-ku-ool:** in la qiimeeyo loona hubiyo heerka ilaa xad uu qorshe, siyaasadda, barnamij ama mashruuc uu ka gaadhay ama la filaayo inuu ka gaadho himilloyinkiisa;

c) **Wartar:** in la cabiro midhaha (output) iyadoo laga eegaayo geshiga (inputs) lagashaday si loo qiimeeyo in midhuhu ay saamigal ku yihiin geshiga iyo in kale,, in la hubiyo heerka ilaa xad uu qorshe, siyaasadda, barnaamij ama mashruuc uu dhalinayo natiijooyinkii looga baahnaa iyadoo la isticmaalaayo geshiga ugu yar uguna waxtarsan ee macquulka ah;

d) **Saameyn:** in lacabiro isbedelka tooska ah iyo kan dadban, togan iyo taban oo loogu talogalay iyo aan loogu talogalin iyo saameynta uu yeeshay qorshe, siyaasadda, barnaamij ama mashruuc; iyo

e) **Waarid:** in lacabiro heerka ilaa xad la filayo in natiijooyinka ama midhaha uu soosaaray qorshe, siyaasadda, barnaamij ama mashruuc ay siisocdaa waqti kaddib.

34. Siyaasaddani waxa qireysaa in dhammaan shuruuduhu aysan kuwada habooneyn qiimeyn oo dhan iyo in go'aamada shuruudaha loo adeegsanaayo xaalad gaar ah ay haboontahay in lagu saleeyo nooca qiimeynta, su'aalaha ugu muhiimsan ee qiimeynta iyo tixgalinaha la xidhiidha hanaanka iyo suurtagalnimada.

**Howlaha Istatistikis-ka**

35. Horumarka ku salaysan xaqiiqda wuxuu u baahan yahay in lagu gundhiyo macluumaadka iyo xogta istatistikiska, taasoo marta dariiq dheer si ay u siiso xog xaqiiqo ku saleesan oo cad oo loo adeegsado dajinta siyaasadda. Ujeedka nidaamyada istatistikiska waa inay soo saaraan xog xiliyeed taxana ah. Taasoo ah mid leesku haleen karo loona adeegsan karo baadh/ogaado isbedelka bulsho iyo dhaqaale ee muddo. Macluumaadka waxaa loo soosaaraa si joogta ah, iyadoo laraacayo jadwal hore loo cayimay, waana mid dhammeystiran oo dabooli doonta guud ahaan Qaranka (national coverage)

36. Iyadoo la tixgalinayo duruufaha hadda jira iyo sida ay u qaabeysay dhawrkii sano ee la soo dhaafay, Soomaaliya kheyraadka istatistikiska way caqabadaysan yihiin, sidaas daraadeed tirakoob (statistics) la iskuhalayn karaa guud ahaan way xaddidan tahay. Si kastaba ha ahaatee, waqtiga dheer, Dawladda Federaalku waa inay diyaarisaa istaraatiijiyada Qaran ee Horumarimta istatikiska taasoo siin doonta wadanka istaraatijiyad lagu xoojinaayo awooda istatistikiska ee guud ahaan nidaamka Qaran ee istatistikiska.

**Howlaha Warbixinta**[6]

37. Dhammaan matalayaasha (actors) Dawladdu Waxay soo saari baahina/qeybina warbixinaha soo socda **:**

1. **Warbixinta Dib-u-eegidda Waxqabadka ee Rubuc-Sanadeedka:** Heerka DXF, warbixinaha waxqabad ee rubuclaha ah ayaa lagu soo jeedin doonaa laagana doodi doonaa kulanka/shirka dib-u-eegidda ee rubuc sanadeedka kaas oo ay qaeybgalayaan dhaqan-galiyayaasha ugu muhiimsan ee DXF.

2. **Warbixinta Waxqabadka ee Sanadlaha ah :** Warbixinta sanadlaha ah ee waxqabadku waxay qiimayn hor-u-kaca qorshayaasha shaqo ee sanadlaha ah ee matalayaasha, waxayna bixin qiimeyn guud oo ah waxqabadkooda iyagoo loo eegaayo yoolashii/bar-tilmaameedyadii udaganaa. Dhammaan matalayaasha DXF waxaa laga rabaa inay warbixinahooda isu uruuriyaan/isugeeyaan iyagoo raacaya waqtiga loo asteeyay gudbinta warbixinta ee heer Federaal iyo heeerarka la dhaadhiciyay kaddibna ay usoo gudbiyaan WQM&HDH is ay u diyaariso warbixinta waxqabadka sanadlaha ah. WQM&HDH waxay diyaarin doontaa nashqad loo adeegsado diyaarinta warbixinta sanadlaha ah ee waxqabadka sanadlaha ah si caqabadaha waxqabadka qeybta loogu soo bandhigo qaab fududayn kara geedi socodka maareynta aqoonta.

## 6.0 Dowrarka Iyo Mas'uuliyadaha

### Guud-mar

38. Kormeerka iyo qiimeyntu waa mas'uuliyad ay wada leeyihiin DF. Heerar kala duwan danwadaag kala duwan oo ku howlan shaqooyin kala duwan ee gudaha DF. Sawir (muuqaal) adag ayaa oo muujinaayo cidda ku lugta leh iyo waxa la qabanaayo ayaa kasoo baxaaya.

---

[6] Waxaa lagasoo guuriyay Qorshaha Horumarinta Qaranka. DFS. 2017-2019. Final-October.p. 183

39. Mas’uuliyada bulsho ee dhammaan wakaaladaha ay khusaysa waxay u baahan tahay in ay lasocod siiyaan dadweynaha xaqiiqooyinka barnaamijyada iyo mashaariicda loogu talagalay inay gaadhsiiyaan muwaadiniinta alaabooyinka iyo adeegyadaba. Waa qeyb muhiim ah oo kamid ah waajibaad kooda si ay ubixiyaan macluumaadka khuseeya barnaamijka shaqooyinkiisa ama wixii arrimo kale ee ay raadinayaan hay’adaha iyo shaqsiyaadka ay khusayso.

40. Waa muhiim in la xaqiijiyo in dhammaan daneeyayaasha lagu wargeliyo hawlaha iyo midhaha (outputs) barnaamijyada / mashaariicda kala duwan ee ay ku hawlan yihiin hay'adaha / wakaaladahaa dawladdu, oo laga dhigo kuwa buuxiya waajibaadkooda bulsho.

41. Dhammaan daneeyayaashu waxay si toos ah ama si dadban ugu lugyeelan doonaan hawlaha Kormeerka iyo Qiimeynta (K&Q). Sidaa awgeed, habka qeyb-qaadashada oo u baahan in laga qeyb-geliyo dhammaan matalyaasha/kooxaha muhiimka ah iyo daneeyayaasha ugu mudan ayaa la dhaqan gelin doonaa. Tani waxay awood u siin doontaa dhammaan matalayaasha ugu muhiimsan inay si buuxda u gutaan una yeeshaan nidaam iyo sidoo kale inay u isticmaalaan natiijooyinka si ay ugu helaan xog ficillada / hawlaha ay fulin doonaan.

## Dowrarka iyo Mas'uuliyadaha[7]

42. Dowrarka iyo mas'uuliyadaha hay'adaha dawliga ah ee khuseeya waxqabadka kormeerka iyo qiimeynta ayaa si faah-faahsan ayaa hoos ku xusan. Tani waxay xaqiijin isku-duwid habboon waxayna sahlaysaa is waafajinta iyo isu-dheelitirka kormeerka, qiimeynta iyo ugu dambeynta hagaajinta adeeg-bixinta adeegyada dadweynaha.

---

[7] Waxaa laga soo guuriyay Qorshaha Horumarinta Qaranka, DFS, 2017-2019, Final-October, p 183

***43. <u>Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha:</u>***

Wuxuu qabtaa kormeerka barnaamijyada Dawladda ugu muhiimsan si uu u siiyo talo-bixin siyaasadeed Golaha Xukuumada iyo in uu warbixin siiyo Madaxweynaha:

1) Wuxuu la socdaa si guud hirgelinta Qorshaha Horumarinta Qaranka; iyo
2) Wuxuu siiyaa dadweynaha warbixinta hor-u-kaca QHQ iyadoo lagu bixin doono qudbada sanadlaha ah ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

44. ***<u>Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH)</u>***

1) Waxay hagtaa Hay'adaha Dawladda Federaalka waxayna xaqiijisaa isku-duwid habboon iyo kor-kala-socoshada hawlaha K&Q;
2) Waxay diyaarisaa qorshayaasha horumarka ee muddada gaaban iyo dhexe ee Waddanka, kuwaas oo ah kuwo natiijo-dhalin leh, dhammeystiran oo isku-dhafan;
3) Waxay midaysaa oo ay ka dhigtaa caadi (standard) hannaanka, habdhaqanka iyo farsamooyink K&Q ee hay'adaha Federaalka;
4) Waxay siinaysaa taakulayn farsamo korkana kala soconaysaa unugyada qorsheynta, kormeerka iyo Qiimeynta (PME) ee Wasaaraddaha;

   *a*) Hawlgelinta shaqooyinka kormeerka iyo istatistikiska; iyo

   *b*) Nashqadeynta iyo hirgelinta qorshayaasha qiimeynta.

5) Waxay nashqadayn idman ku samaynaysaa dhawridda tayada si waafaqsan qiimeynta baahinta/qeybinta qorshe ee QHQ;
6) Waxay si gooraale ah Golaha Xukuumadda ugu gudbinaysaa warbixinaha waxqabadka iyo natiijooyinka Dawladda;
7) Waxay lasocota / kormeertaa dhaqangelinta habraaca iyo qorshaha K&Q;

8) Waxay taakulaynasaa horumarinta awoodda maxalliga / gudaha ee qorsheynta Qaranka, gaar ahaan waxay siisaa taakuleyn iyo hagidda shaqsiyaadka heer Qaran iyo maxalli ah oo mas'uul ka ah dhaadhicinta/daadajinta geeddi-socodka qorsheynta;
9) Waxay daraasaysaa oo ay daabacdaa qiimeyn madax banaan ee muhiimka ah ee caqabadaha iyo khiyaaraadka looga bixi karo ee dhaqaalaha iyo siyaasadda bulshada, si kor loogu qaado fahanka dadweynaha iyo ka qeybgalka doodaha dhaqaalaha iyo siyaasadda bulshada;
10) Waxay gacan ka gaysataa diyaarinta warbixinta Waxqabadka Dawladda ee Sanadlaha ah iyadoo siisa xog iyo caddayn ku aaddan hor-u-kaca himmilooyinka qorshaha horumarinta Qaranka;
11) Waxay kormeertaa waxqabadka nidaamka la dhaadhiciyay ee qorsheynta horumarka, waxayna soo jeedisaa casriyaynta looga baahan karo, wanaajinta shaqadiisa;
12) Waxay kormeertaa, qiimeysaa waxtarka iyo saameynta barnaamijyada horumarka iyo waxqabadkooda dhaqaale;
13) Waxay xiriir kala samaysaa qeybaha gaarka loo leeyahay (private sector) iyo bulshada rayidka ah (civil society) qiimeynta waxqabadka Dawladda iyo aqoonsiga iyo buuxinta gol-duleellooyinka siyaasadaha iyo barnaamijyada Dawladda;
14) Waxay ku samaysaa qiimeyn qoto-dheer/xeel-dheer oo saameynta iyo kharashaadka barnaamijyada horumarinta ee la xushay; iyo
15) Waxay soosaartaa xogta muhiimka ah ee kormeerka iyo qiimeynta barnaamijyada Dawladda. Xogtan, oo u badan heerka tilmaameyaasha natiijada (outcome indicators) iyo saamaynta (impact), waa in laga soo saaraa muunado/sahanno (sample surveys) ku salaysan qoyska.

45. ***<u>Wasaaradda Maaliyadda:</u>***

1) Waxay isku-dubaridda diyaarinta iyo soo bandhigida miisaaniyadda qaranka;

2) Waxay xaqiijisaa in maasaniyada qaranka kheyraad ku filan looga qoondeeyo sanadkii shaqooyinka istatistikiska, kormeerka iyo

qiimeynta ee Dawladda taas oo waafaqsan habraaca iyo qorshaha K&Q;

3) Waxay la socotaa/kormeertaa fulinta miisaaniyadda iyo hor-u-kaca balanqaadyadii lagu heshiiyay (MoUs commitments) si kor loogu qaado in dhamaan kharashaadka dawladda loo adeegsado si sax ah (effectiveness) iyo in lagu qabtay dariiqooyinka ugu saxan (efficiency).

4) Waxay siidayn macluumaadka fulinta miisaaniyadda oo tayo leh isla markaana waqti ah;

5) Waxay si gooraale ah ugu gudbin kor Golaha Xukuumadda iyo Mudanayaasha warbixinta diyaarinta, fulinta iyo waxqabadka miisaaniyadda;
6) Waxay kormeerta fulinta miisaaniyadda horumarka iyadoo adeegsan doonta koontooyin (akoono) mashaariicda deeq-bixiyayaasha oo khaas ah;

46. ***<u>Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dawladaha Hoose</u>***
1) Waxay ka caawinaysaa dawladdaha hoose diyaarinta qorsheyaal natiijo-dhalin leh iyo miisaaniyaddaha.

2) Waxay xoojisaa maamulka suuban ee dawladda hoose iyo u-gudbinta warbixinta qaybaha kasareeya iyagoo hormarinaya nidaamyada iyo dhaqanka kormeerka iyo dabagalka ee Dawladdaha Hoose;

3) Waxay kor kala soconaysaa Dawladaha Hoose iyo u hoggaansanaantooda shuruudaha sharciga iyo raacida siyaasadaha iyo xeerarka Qaranka.

47. ***Wasaaraddaha Bah-wadaagta ah (Line Ministers)***

1) Waxay xaqiijinayaan in hawlaha kormeerka, qiimeynta iyo istatistikiska ee kujiro adeega dadweynaha lagu meeleeyay shaqaale ku filan;

2) Waxay xaqiijinaysaa hawl-gelinta maareyn ku salaysan natiijo (RBM) ee adeega dadweynaha;

3) Waxay isku-duweysaa hawlaha qiimeynta adeega dadweynaha, sidoo kale marka ay habboon tahay, waxay qaadaysaa qiimeyno khaas ah;

4) Waxay xaqiijinaysaa in dhammaan wasaaraduhu iyo wakaaladuhu ay hal boos ama ka badan ku qoraan dad mas'uul ka ah soo-saaridda istatistikiska, kormeerka iyo qiimeynta.

5) Waxay xaqiijinaysaa in Nidaamka Maareynta Macluumaadka (MIS) uu diyaar yahay isla markaana uu shaqaynaayo / hawl-gal yahay;

6) Waxay qorsheynaysaa oo ay miisaaniyad sanadle ah u qoondeynaysaa kormeerka iyo istatistikiska;

7) Waxay qabanaysaa kulamada rubuclaha ee dib-u-eegista Waxqabadka Tiirka (Pillar) si loo ogaado hor-u-socodka ku aaddan yoolasha/bar-tilmaameedyada miraha (output targets);

8) Waxay si rubuc sanadle ah usiin/ugu gudbin MOPIED xogta iyo macluumaad sharaxaad ah oo kusaabsan hor-u-kaca/horumarka marka laga fiiriyo tilmaameyaasha waxqabad (performance indicators);

9) Waxay xaqiijin isu-duwid iyo kor-kala socosho habboon oo ku aadan howlaha K&Q ee hawl-wadeenada Tiirka (Pillar Working Groups).

10) Waxay qorsheyn oo ay miisaaniyadna u qoondeynaysaa qiimeynta dhammaan mashaariicda iyo barnaamijta lacagtoodu kabadan

tahay **USS$100,000** (boqol kun) oo doolar, taas oo waafaqsan qorshaha qiimeynta ee QHQ;

11) Waxay adeegsan natiijooyinka kasoo baxa K&Q si ay u wargeliyaan go'aannada barnaamijka. Siyaasadda iyo qoondeynta kheyraadka;

12) Waxay diyaarin qorshe lagula soconayo dhaqan-gelinta tallooyinka, kaasoo la socon doona talooyinka dib-u-eegista iyo qiimeynta, talaabooyinka la socosho oo la isku waafaqsan yahay iyo xaalada/halka ay marayaan hawlahaas;

13) Waxay xaqiijin in warbixinta dhammaystiran ee K&Q ee la'ansixiyay in laga dhigay mid dadweynuhu ay hawlyaraan ku heli karaan waqtiga ay rabaan;

***<u>48. Dawladdaha Hoose;</u>***

1) Waxay soo saarayaan qorsheyaasha Horumarinta Dawladda Hoose oo natiijo leh;
2) Waxay xaqiijinayaan isu-duwidda howlha kormeerka ee laga fulinayo degmada oo habboon;

3) Waxay siin xog waqti iyo tayo leh oo ku saabsan tilmaameyaasha waxqabadka muhiimka ah Wasaaradda Warfaafinta (MoI). Wasaaradda Qorsheynta, Maal-gashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED);

4) Waxay xaqiijin in dhammaan waaxaha qorsheynta ee Dawladdaha Hoose ay hal boos ama ka badan ku qoraan dad mas'uul ka noqda soo-saaridda xogaha istatistikiska, kormeerka iyo qiimeynta;

5) Waxay adeegsan natiijooyinka kasoo baxa K&Q si ay u wargeliyaan go'aannada barnaamijka, siyaasada iyo qoondeynta kheyraadka;

49. ***Xafiiska Hanti-dhawrka Guud***

1) Waxay hanti-dhawrku gelinayaan warbixina kasoo saarayaan dhammaan koontooyinka (akoonada) dawladda ee dhammaan xafiisyada dawladda iyo shirkad kasta oo dawladu leedahay ama lagu ansixiyay xeer Baarlamaan;

2) Waxay hanti-dhawr maaliyadeed, qiimaha u dhigma lacagta (value for money), iyo hanti-dhawro kale ku sameynayaan mashruuc iyo hawl kasta oo la xidhiidha ama lug ku leh lacagaha dawladda.

50. ***Baarlamaanka***

1) Waxay baadhi walxaha/waxyaabaha kala duwan ee kharashka lagu bixinayo iyo wadarta lagu kharashgaraynayo mid kasta;

2) Waxay xaqiijin daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka isticmaalka Deeqda/lacagaha dawladda;

3) Waxay kormeeri dhaqan-gelinta barnaamijyada iyo mashaariicda Dawladda;

51. ***Dawladdaha Xubnaha ka ah Federaalka***

1) Waxay soo saari Qorsheyaasha Horumarinta Dawlad-goboleedyada oo natiijo-dhalin leh;

2) Waxay xaqiijin isu-duwida habboon ee dhaqan-gelinta, kormeerka, dib-u-eegidda iyo qiimeynta heer Dawlad-goboleed iyo ka hoosba;

3) Waxay siin xog waqti iyo tayo leh oo ku saabsan tilmaameyaasha waxqabadka muhiimka ah Wasaaradda Qorsheynta, Maal-gashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED), wasaaradaha iyo wakaaladaha kale ee ay wada-shaqeynta leeyihiin;

4) Waxay xaqiijin in dhammaan DXF ay yeeshaan wasaaarado qaabilsan hawlaha qorsheynta, istatistikiska, Kormeerka iyo Qiimeynta;

5) Waxay soo saari warbixinta waxqabadka sanadlaha ah oo waafaqsan himmilooyinka iyo yoolasha/bar-tilmaameedyada QHQ iyo Qorsheyaasha Horumarinta DXF ee u dhigma;

6) Waxay adeegsan natiijooyinka kasoo baxa K&Q si ay u wargeliyaan go'aannada barmaajika, siyaasada iyo qoondaynta kheyraadka;

52. ***Goleyaasha Degmada;***

1) Waxay kor-joogtayn hawlaha kasocda Degmada;

2) Waxay adeegsan natiijooyinka kasoo baxa K&Q si ay u wargeliyaan go'aannada siyaasada iyo qoondeynta kheyraadka;

3) Waxay xaqiijin in mamulka degmadu u hoggaansan yihiin heerarka iyo dhaqamada wan wanaagsan ee K&Q;

53. ***Wakaaladaha / Hay'adaha kale ee fulinaaya (CSOs iyo Qeybaha gaarka looleeyhay);***

1) Waxay ka qeyb-qaadan geedi-socodka qorsheynta qaybta dawladda ee heer Federaal, DXF iyo Dawlada Hoose;

2) Waxay siin Udbaha / Tiirarka (Pillars), Wasaaradaha, Hay'adaha / Wakaaladaha iyo ama Dawladdaha Hoose ee muhiimka xog waqti iyo tayo leh oo khusaysa maaliyadda iyo dhaqan-gelinta muuqata ee mashaariicda ay wakaaladaha fulinaaya ka yihiin;

3) Waxay ka qayb-geli doodaha iyo guddiyada go'aanada qaadata ee heer Barnaamij iyo Qaran kuwaas oo did-u-eega kana talo-bixiya waxqabadka qaybta Dawladda;

4) Waxay u baahan in shaqooyinkooda ay waafajiyaan barnaamijyada iyo mashaariicda qeybta dawladda, sidoo kalena u hoggaansamaan waajibaadka dawladda ee warbixinta;

5) Waxaa laga fili/rajeyn in ay ka caawiyaan Dawladda (agab, maaliyad iyo dhanka kheyraadka bani'aadamka (gudbinta khibradda)) si ay u hirgeliso mashaariicda / barnaamijyada iyo hawlaha K&Q.

54. ***<u>Dan-wadaagta Horumarinta (Development Partners)</u>***

1) Waxay bixin aragti dibadeed oo ku aaddan waxqabadka iyo natiijooyinka dawladda;

2) Waxay siin xubnaha gudaha iyo dibadda hubaal-celin ku aaddan waxqabadka iyo natiijooyinka dawladda;

3) Waxay ku caawin maaliyad, farsamo iyo noocyada kale ee macaawino Dawladda si ay kor u qaado waxqabadkeeda.

## 7.0 ***<u>Adeegsiga Natiijooyinka K&Q</u>***

**Adeegsiga Natiijooyinka Kormeerka iyo Qiimeynta**

55. Siyaasada Qaranka ee Kormeerka iyo Qiimeyntu waxay u baahan tahay in natiijooyinka kormeerka iyo qiimeyntu yihiin kuwo la isticmaali karo si ay u wargeliyaan/xogsiiyaan go'aan qaadashada si loo wanaajiyo adeeg bixinta.

56. Agaasinka K&Q waa inuu lasocdaa faafinta/qeybinta xogta laga soo saaray kormeerka iyo qiimeynta si loo wargeliyo dhammaan daneeyeyaasha (stakeholders) hor-u-socodka dhaqan-gelinta siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda.

57. Dhamaan hay'adaha waxaa looga baahan doonaa inay yeeshaan qorshe lagula soconayo dhaqan-gelinta talooyinka, kaasoo la socon doona talooyinka dib-u-eegista iyo qiimeynta talaabooyinka

lasocosho oo la isku waafaqsan yahay iyo xaaladda / halka ay marayaan hawlahaas.

58. Dawladda Federaalka waxay u adeegsan doontaa K&Q ujeedooyinka soo socda;

1) **Wanaajinta Tayada:** Agaasinka K&Q wuxuu adeegsan doonaa natiijooyinka K&Q si uu u wanaajiyo / hormariyo tayada iyo waxtarka shaqadooda. Sidaa darteed, Sidaa darteed K&Q waa qayb muhiim ah oo ka mid ah maareynta tayada ee horumarinta shaqooyinka agaasinka K&Q; K&Q waxay dowr muhiim ah ka ciyaartaa ka helidda waajibaadyo cusub shaqooyinka horumarineed oo leh macaamiil cusub iyo xoojinta dhisidda xidhiidhkii macaamiishii hore u jirtay.

2) **Barasho (learning) :** MOPIED waxay isticmaalaysaa natiijooyinka K&Q si ay u taageerto geedi-socodka barashada ee barnaamijyada iyo guud ahaan Dawladda.

3) **Hoggaaminta (steering) :** Cadaymaha natiijooyinka ayaa la aruurin si ay wax ugu biiriso go'aannada hoggaamineed ee dhammaan heerarka kala duwan, laga bilaabo barnaamijyda kelida ah ilaa maareynta iyo hoggaaminta. M&E sidaas darteed waxay aasaas u tahay go'aannada hawl-galka, istiraatiijiyada iyo maareynta.

4) **Warbixinta iyo Isla-xisaabtanka:** MOPIED waxay isticmaali doontaa K&Q si ay ugu xisaabtanto shaqooyinkeeda ee loo idmaday, macaamiisha iyo guud ahaan dadweynaha. Isla-xisaabtanka oo ahmiyad gaar ah u leh qeybaha idmanaya iyo dhammaan macaamiisha DF, waxaa sidoo kale ku jira warbixinta natiijooyinka lagaadhay.

5) **Isgaarsiin:** Natiijooyinka iyo talooyinka K&Q ee leh ujeeddo hoggaansanaan ay la socoto waajibaadyo isla-xisaabtan iyo wargelin qeybaha idmaday iyo macaamiisha ayaa la daabici.

Gudaha DF, dhammaan warbixinaha qiimeynta ee dhammaan qeybaha kala duwan ee shaqo waxay ku diyaarsanaan doonaan keydka dhexe ee xogta (central database). Waxaa la xaqiijin daah-furnaanta iyadoo xubnaha dadweynaha ee daneynaya loo ogolaan doono inay qaab *Online*-ah ku helaan qiimeynaha mashaariicda oo kooban.

6) **Geedi-socodka Barasho:** Sida hay'ad waxbarasho oo kale, DF waxay doonaysaa inay natiijooyinka K&Q-ta ay u isticmaasho geedi-socod wax ka barasho oo guud ahaan dawladda ah. Natiijooyinka K&Q waxaa la-galin geedi-socod loona isticmaali si ay u fududayso wax-ka barashada barnaamijyada heer tiir (Pillar) iyo guud ahaanba Dawladda. Haddaba, si ay dawladu uga faaiidaysato aqoontan, waa in lagu daraa geedi-socodyo dheeraada oo Dawladda oo dhan ah. Tani waxay u baahan tahay xog is weydaarsi heerar kala duwan ah: mid jiifto ah oo u dhaxeeya qaybaha kala duwan ee dawladda, iyo mid joog ah oo u dhaxeeya heerarka kala duwan ee Dawladeed, laga soo bilaabo maareynta ilaa shaqsiyaadka shaqaalaha ah. Shaqada ugu muhiimsan halkan waxay tahay in geedi-socodka khibrada loo galiyo dariiq ay daneeyayaasha kala duwani ay wax uga baran karaan geedi-socodyada kala duwan.

7) **Maareynta Hubaal-Celinta:** Si loo xaqiijiyo in Dawladu ay si cilmiyaysan uga jawaabto talo bixinta K&Q. Agaasinka Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa isu-duwi doona nidaam jawaab-celineed , kaasoo si cilmiyaysan usoo bandhigaya qiimeynaha iyo talooyinka sidoo kalena bixinaya sababaha loo ansixiyay ama loo qaadacay/diiday. Talaabooyinka quseeya fulinta talooyinka waa qaar si toosa la isugu raacayo iyagoo qayb ka ah nidaamkan. Agaasinka Kormeerka iyo Qiimeynta ayaa is joogto ah ula socon doona/fiirin doona xaalada dhaqan-gelineed ee talooyinka la aqbalay. K&Q-tu waxay shaqaysaa oo ay qayb ka qaadataa horumar waara kaliya marka loo adeegsado/isticmaalo in lagu gaadho go'aano kama dambaysa iyo in isbedel la horseedo.

## 8.0 Horumarinta Awooda K&Q

### Hordhac

59. Waxaa aad muhiim u ah in Nidaamka K&Q uu helo cudud shaqaale oo ku filan kuwaas oo leh xirfadaha loo baahan yahay, si uu waxtar u yeesho, waxaa muhiim ah in laga dhiso awoodda uruurinta macluumaadka waxqabadka iyo awooda isticmaalka macluumaadka K&Q ee hay'adaha dhexdooda iyo nidaamka. Helida nidaam fiicann oo K&Q ah kuma filna; baahi caqli gal ah oo loo qabo K&Q ayaa sidoo kale ah muhiim.

60. Qiimeynta baahida iyo awoodda K&Q waxay wargelin u noqon horumarinta kaabayaasha K&Q iyo raasu'maalka aadanaha/dadka ee dhammaan heerarka kala duwan. Agaasinka K&Q waa in uu si joogta isugu duwaa qiimeynta baahiyaha K&Q ee heerarka kala duwan. Agaasinka K&Q waa inay sidoo kale ogaadaan baahiyaha kale ee awoodeed ee laga yaabo inay hortaagan yihiin dhaqan-gelinta barnaamijyada. Miisaaniyadaha K&Q ee qorsheynta istiraatiijiyada, Mashaariicda iyo shaqada heerarka barnaamij waa inay bixisaa horumarinta kaabayaasha K&Q iyo raasu'maalka aadamiga.

61. Agaasinka K&Q oo kaashanaya Wasaaradda dan-wadaagta ay yihiin, Dawladaha xubnaha ka ah Federaalka, iyo daneeyeyaasha kale ee muhiim ka ah waa inay hormarisaa awoodaha heerarka kala duwan si ay u xaqiijiso dhaqan-gelinta siyaasada K&Q oo sax ah. Tani waxay waafaqsan tahay horumarinta dhaqan ee maareyn ku salaysan Natiijo (RBM), barasho iyo ka turjumida geedi-socodyada barnaamij iyo guulaha. Barnaamijyada kobcinta awoodu waa in loo nashqadeeyo loona dhaqan-geliyo hab ku salaysan baahiyaha gaarka ah ee kajira dhammaan heerarka kala duwan.

### Awoodaha Farsamo iyo Maareyn

62. Agaasinka K&Q waa inuu diyaariyo hab lagu xaqiijinaayo in shaqaalaha K&Q lagu hubeeyo khibrado ku filan iyo awoodo ay si

habboon ugu fuliyaan shaqooyinkooda si ay u diyaariyaan nidaam iyo awood kormeer iyo qiimeyn ee barnaamijyada.

63. Barnaamijka horumarinta awoodda K&Q ee Wasaaraddaha DF, Wasaaraddaha DXF iyo dawladdaha hoose waa in la diyaariyaa lana dhaqan-geliyaa.

64. Hawlaha kobcinta awooddu waa inay xaqiijiyaan:

1) In isticmaalayaasha xogta K&Q fahmaan sida shaqooyinka K&Q loogu dabaqayo mas'uuliyadahooda gaarka iyo sida looga falceliyo natiijooyinka K&Q isticmaalaha K&Q Waa inuu awooddaa inuu qiimeeyo macluumaadka lagu soo uruuriyay geedi-socodka K&Q, una isticmaali karaa sidii qalab/aalad lagu qatao go'aannada maaraynta iyo sidii uu u wanaajin lahaa faro-gelinta mustaqbalka isagoo adeegsanaya geedi-socod qorshe.

2) In maareeyeyaasha qeybta dawladdu ay awooddaa in ay diyaariyaan nidaam K&Q, maareeyaan nidaamkaas, kana soo saaraan natiijooyinka looga baahan yahay. Maareeyaha K&Q waa inuu awooddaa in uu isku xidhi karo qeybaha kala duwan ee shaqada K&Q ee xidhiidhka leh, si ay u sameeyaan nidaam isku-dhafan.

3) Fuliyaha K&Q ee dawladdu waa inuu awooddaa inuu adeegsado hanaan xaqiiq-ku-salaysan (evidence-based approach) si uu u uruuriyo una falanqeeyo xogta hawlaha/shaqooyinka dawladda. Uruurinta xogtu waa in ay ku salaysnaataa hab casriyaysan (scientific methods), iyadoo la adeegsanayo aalado kala duwan sida tilmaameyaasha iyo cabiraadaha kale ee lagu kalsoonaan karo. Xogta noocan ahi waa inay si cad u muujisaa in si wacan dawladdu u fulinayso shaqooyinkeeda la xidhiidha faro-gelino gaar ah iyo adeegeeda guud ahaaneed, mashaariicda iyo barnaamijyada.

## 10.0 U hogaansanaanta Siyaasada iyo Mabaadii'da K&Q (Compliance with M&E Policy and Standards)

### U-hoggaansanaan

65. Dhammaan daneeyayaashu waa inay u hoggaansan yihiin siyaasada Qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta si loo xaqiijiyo in si habboon loo dhaqan-geliyo siyaasadaha, barnaamijyada iyo mashaariicda dawladda. U-hoggaansaanaanta siyaasadani waa ku-toosnaanta tilmaamaha/hagayaasha, mabaadii'da, wadiiqooyinka shaqada iyo awaamiirta.

66. Dhammaan Hay'adaha dawliga ah, Bulshada rayidka ah, iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay ee ka diiwaan gashan dawladda isla markaana haya maaliyad dadweyne waxaa looga baahan yahay in ay u hoggaansamaan shuruudaha siyaasadan qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta. Shuruucda lagu dajiyay dhukumintigan Siyaasada ee hagaaya geedi-socodka kormeerka iyo qiimeynta waa in lagu dabaqi karaa qaab-dhismeedyada dawladda.

67. Shuruudaha U-hoggaansanaanta iyo Waajibaadka waxaa kamid noqon:-

1) Waajibaadyada warinta (warbixinta) iyadoo la-raacaayo naqshadaha lagu heshiiyay;
2) Raacida mabaadii'da siyaasada qaran ee Kormeerka iyo Qiimeynta;
3) Raacida shuruudaha Kormeerka iyo Qiimeynta; iyo
4) Ku-sugnaanta tayada, tirada, waqtiga iyo kharashka lagu heshiiyay (tan waa in la qeexo lagulana heshiiyo daneeyeyaasha)

### U-hoggaansan la'aan

68. U-hoggaansami la'aanta siyaasadan waxaa lagu maareynayaa qaab cuna-qabatayn ah oo lasaarayo ciddii u hoggaansami wayda shuruudaha.

69. Wasaaraddaha dan-wadaagta ah, DXF iyo Dawladdaha hoose waxay qaadi doonaan mas'uuliyadda gaadhida yoolasha/bar-

tilmaameedyada la dajiyay laguna heshiiyay sanadkiiba isku xardhan/qoran qorshahooda shaqo. Xogta waxqabadka ee Tiirasha iyo Dawladdaha hoose marka loofiiriyo yoolasha/bar-tilmaameedyada la-dajiyay ayaa dhibco la-siin doonaa, hay'adahana waa la xadayn doonaa (will be benchmarked).

**Lifaaq I**

**Isla-xisaabtan**[8]: Waajibaadka in lasoo bandhigo in shaqada lagu qabtay si waafaqsan shuruucda iyo heerarkii lagu heshiiyay ama in si daacada oo sax ah looga warbixiyo natiijooyinka waxqabadka ee dowrka waajibaadka ama qorshaha. Tani waxay u baahan kartaa taxaddar, xitaa sharci ahaan la difaaci karo, soo bandhigid in shaqadu ay waafaqsan tahay shuruudaha heshiiska

**Hanti-dhawr:** Waa hawl loo naqshadeeyay qaab dammaanad-qaad himmillo oo madaxbanaan si qiimo loogu yeelo loona wanaajiyo shaqooyinka hay'adaha. Waxay ka caawisaa hay'adda in ay gaadho himmillooyinkeeda iyadoo keenaysa hannaan dhawrsoon si loo qiimeeyo loona hagaajiyo waxtarka geedi-socodyada maareynta khatarta, xakamaynta iyo maamul-wanaagga (maamulka suuban).

**Wax-ku'ool** (Effectiveness): ilaa heerkii laga gaaray hirgelinta himmillooyinka faro-gelinta horumarineed, ama la filaayo in laga gaadho iyadoo la tixgelinayo sida ay u kala mudan yihiin

**Waxtar** (Efficiency): Qiyaasta sida si dhaqaale ahaana kheyraadka/geshiga (lacagaha, khibrada, waqtiga, iwm) loogu badalay natiijooyin.

---

[8] Qeexida iyo dhammaan kuwa kaleba waa qaar la isla ogolyahay heer caalami oo laga soo qaatay ''Glossary of key Terms in Evaluation and Results Based Management , OECD, 2010''

**Qiimeyn:** waa u kuur-gal nidaam ujeedo leh oo lagu sameeyo mashruuc, barnaamij ama siyaasad socota ama dhamaystirmay, naqshadooda, dhaqanglintooda iyo natiijooyinkooda. Ujeedku waa si loo ogaado ahmiyadda iyo buuxinta himmillooyinka, waxtarkooda horumarka.

Wax ku-oolnimada, saamaynta iyo waaritaanka. Qiimeyntu waa inay noqotaa mid laga helo macluumaad la isku haleyn karo oo faa'iido leh, taasoo awood inoo siinaysa in casharadii aan baranay ku dabaqi karno geedi-socodka go'aan qaadashada ee qaateyaasha iyo deeq bixiyeyaasha

**Qiimeynta Debedda** (external evaluation): Qiimeynta waxqabad faro-gelin horumarineed oo ay fulisay hay'ad ama shaqsiyaad ka baxsan deeq bixiyaha iyo hay'adda fulinaysa.

**Warcelin** (Feedback): U-gudbinta natiijooyinka kasoo baxda geedi-socodka qiimeynta qeybaha ay muhiimka iyo faa'iidada u leeyihiin si loo fududeeyo barashada. Tan waxaa kamid noqon kara uruurinta iyo faafinta/qeybinta natiijooyinka, gabagabada, talooyinka iyo casharada laga helay khibrada.

**Yool** (Goal): Waa hamilada sare ee waxqabadka faro-gelin horumarineed ee loogu tala-galay inuu wax biiriyo / kordhiyo.

**Saameyn:** Saameyn wanaagsan (taban) iyo saameyn xun (togan), waa saameynta koobaad iyo labaad ee muddada-dheer ee uu dhaliyay waxqabadka faro gelin horumarineed, taas oo toos ah ama dadban, loogu talogalay ama aan loogu talo-gelin.

**Tilmaame** (indicator): shay tiro ama tayo ama doorsoome kaasoo ina siiya hab fudud oo la isku haleyn karo oo aan ku cabirno

guusha si loo muujiyo isbedelada ku xidhan faro-gelin (intervention), ama si loo caawiyo qiimeynta waxqabadka shay horumarineed (development factor).

**Geshi** (Inputs): Maaliyadda, Dadka iyo kheyraadka alaabta loo isticmaalo faro-gelin horumarineed.

**Casharada La bartay:** Jaan-gooyooyin ku salaysan khibradaha qiimeynta mashruucyada, barnaamijyada ama siyaasado kuwaasoo oo laga soo koobay marxalado gaar ah ilaa xaaladaha balaadhan, badanaa casharadu waxay iftiimiyaan awoodaha ama daciifnimada diyaarinta, naqshadaynta iyo dhaqan-gelinta kuwaas oo saameeya waxqabadka, natiijada iyo saameynta guud.

**Qiimeynta Muddada-Dhexe** (Mid-term evaluation): Qiimeynta la fuliyo bartamaha xiliga dhaqan-gelinta faro-gelin (bartamaha cimriga mashruuca).

**Kormeer:** Waa hawl xidhiidhsan /joogt ah taas oo isticmaali xog si nidaamsan looga uruuriyay muujiyeyaal (indicators) gaar ah si ay uga caawiso maareynta iyo daneeyayaasha muhiimka ah ee faragelin horumarineed (development intervention) oo socota, muujinta heerka hor-u-socod iyo guul ee himmillooyinka iyo hor-u-socodka isticmaalka maaliyaddaha loo qoondooyey.

**Natiijo** (Outcome): Waa saameynta muddada-dhaw ama muddada-dhexe ee midhaha (outputs) faro-gelin (intervention) kuwaas oo la filaayo amaba la gaadhay/hantay.

**Miro-dhal** (Outputs): Waa wax-soo-saarka, raasa'maalka alaabooyinka iyo adeegyada kuwaas oo ka dhasha faro-gelinta horumarka (development intervention); waxaa sidoo kale ku jiri kara isbedelada ka dhasha faro-gelinta muhiimka u ah gaadhida natiijooyinka.

**Talo-bixinno** (Recommendations): waa soo jeedino looga gol leeyahay in lagu xoojiyo waxtarka, tayada, wax-ku-oolnimada fara-gelin (intervention) horumarineed: ama in dib loo naqshadeeyo himmillooyinka; ama si dib loogu naqshadeeyo himmillooyinka ; iyo/ama dib u qoondeynta kheyraadka. Talo-bixinaha waa in ay ku xidhan yihiin ama daba-socda gabagabooyinka (conclusions).

**Natiijo** (Results): Waa midhaha natiijada ama sameynta (lagu talo-galay ama aan lagu talo-galin, sameyn wanaagsan iyo/ama sameyn xun) uu leeyahay faro-gelin (intervention) horumarineed.

**Dib-u-eegid** (Review): U-kuur-gal gooraale ah ama aan qorsheysnayn/tooska ahayn ee waxqabadka ay leedahay faro-gelini (intervention).

**Waarid** (Sustainability): Waa sii jiritaanka faa'iidooyinka wax-qabadyada horumarineed kadib marka taageerada horumarineed ee weyni ay dhamaato.